

# Cisbitaalka Degmada Baran oo lagu soo kordhiyey qeybta Caruurta

Waxaa magaalada **Badhan** ee xarunta 2aad ee Gobolka Sanaag dhawaan lagu qabtay xaflad balaaran oo ay kasoo qeyb galeen dhamaan laamaha kala duwan ee Dowlada iyo ururada madaniga ee ka dhisan isla magaalada ayaa lagu wareejinayay qeybta cusub ee caruurta oo ay dhiseen ururka Sahal Community Organisation oo ka dhisan dalka Boqortooyada Ingiriiska.



Xafladan oo ay ka hadleen xubno ka tirsan gudida Ururka Sahal oo kala ahaa Sheekh Caydaruus Axmed Faarax Odey iyo Xaaji Ibraahim Maxamed Guuleed isla markaana iyagu intii ay ku sugnaayeen magaalada **Badhan** ka wakiil ahaa gudida ururka Sahal ee ka dhisan cariga Ingiriiska.



Kharashka ka baxay Ururka Sahal ayaa waxaa baxshay jaaliyada UK ku nool gaar ahaan hablaha u dhashey Maakhir iyadoo ay iyagu bixiyeen kharashka ugu badan ee ururka Sahal.



Ururka Sahal ayaa waxa uu ku dhisan yahay jaaliyada UK ee reer Maakhir isla markaana la'aantooda uusan jiri lahayn iyadoo xubno kor u dhaafaya ilaa 200 qof ay ka qayb qaateen bixinta **£1ka** ee saldhiga u noqotey dhisida qeybta caruurta ee cisbitaalka **Badhan**.



Kordhinta qeybta caruurta ee cisbitaalka **Badhan** ayaa sidoo kale waxaa door lama ilaawaan ah ka qaatey Bulshada ku nool Degmada **Badhan** oo iyagu si tabaruc ah ku bilaabey dhismaha iyo kicinta, sidoo kale ururka Alnasar ayaa iyaguna ka qeyb qaatey door lama ilaawaan ah.



Qeybta Caruurta ama Children Ward ee cisbitaalka **Badhan** ayaa waxaa la rajeenayaa in dhawaan la qalabeeyo iyadoo ay Kheyr jecel ku nool wadanka UAE uu ku hawlan yahay qorshahaas.



Waxaa sidoo kale dhowaan la magcaabay Gudi caafimaad oo ay madax ka tahay Marwo Caasha Taraawil oo ku nool Dalka Canada oo dhowaan u baqooli doonta Sanaag si ugu kuur gasho xaalada guud ee goobaha caafimaadka ee Gobolka Sanaag.

Degmada **Badhan** oo ah magaaloyinka aadka u kobcaya ayaa beryahan danbe waxaa ka socday dhismo xarumaha danta guud sida jaamaca Maakhir oo meel fiican mareysa, Saldhiga weyn oo gobolka ugu weyn iyo suuqyo ay yeelanayaan xaafadaha kala duwan ee magaalada **Badhan**.



La xiriir: **Shirwa** email:razshirwa@gmail.com

---

Faafin: SomaliTalk.com | March 17, 2012